Waalidiinta muxtarimiinta ah,

Ku soo dhawaada sanadka 10aad – waxaan rajeynaynaa wada shaqayn buuxda saan horumar u gaarno!Waxaan si diiran idiinku soo dhaweynayaa ***" ku soo dhawaada habeenka dugsiga sare (KS4)"*** **maalinta khamiista (Thursday 21st September 2023)** oo ka dhacaysa qolka shirarka ee Abraham Moss Community School.

Dugsiga sare (Key Stage 4) waa marxalad mihiim u ah sanad dugsiyeedka ilmahaaga, shaqada lagu qabto sanadkan waa qayb weyn guud ahaan derajada kama dan beysta ah ee GCSE ee la siinayo 2025. U jeedada kulankan wuxuu daaran yahay in macaluumaad lagu siiyo waalidiinta si ay u fahmaan isbedaladii ugu danbeeyey manhajka lagu sameeyey iyo filashada ilmahaaga labadan sano ee soo socda. Waa fursad lagu cadeynayo maalmaha mihiimka iyo caawimada kala duwan ee uu heli karo ardeygu. Waxaan sidoo kale idinla wadaageynaa sida ugu fiican ee wax barashada looga gacan qaban karo intuu ku guda jiro marxaladan mihiimka ah. Bandhigu wuxuu bilaamanayaa 5.00pm dhamaanayaa 6.00pm wuxuuna ka koobnaan doonaa soo jeedino Mrs Arnold (Head Teacher) Mrs Syrichas (Assistant Head Teacher) Mrs Dawson (Head of Year 10) ,sidoo kale waxaa imaan doonaa qaybaha English, Mathematics iyo Science kuwaas oo soo gudbin doona sida looga caawin karo ilamaha iyo waalidka maadooyinkan. Macalimiintu waxay diyaar u ahaan doonaan in ay uga jawaabaan su'aalaha khaaska ah si faah-faahsan ardey kasta iyo sida ay ula qabsadeen sanadka 10aad. Waxaan ka hadlli doonaa mawaa diicda kala ah;

- U jeedooyinka iyo ahdaafta sanadkan
- Macluumaadka mihiimka ee English, Mathematics and Science
- Imtixaano qoraala oo la muraaqabeeyo: Tayada iyo in wakhti lagu dhameeyo
- U diyaarinta tacliinta sare
- U diyaar garowga nolasha bacda Abraham Moss Community School

Buug loogu talo galay waalidiinta ayaa lagu bixin donaa badhiga, kaas lagu soo koobay macluumaad mihiim ah iyo maalamaha calaamadsan ee sanadka.

Waan ku rajo weynahay inaad soo xaadiri doontaan ban dhigan, saan u sii xoojino wada shaqeynta ka dhaxaysa schhoolka iyo waalidiinta sanadkan aadka ugu muhiimka ah wax barashada ilmhaaga.

Fadlan khadkan raac saad u waa faqdo imaanshaha bandhig fiideedkan oo ku aadan Wednesday 20th September 2023. Hadaad wax wel ah qabto fadlan nagu soo war geli formka saaan u uga jawaabno habeen kaas.

Y10 Welcome Evening (google.com)

Mahadsanidiin

Mrs E Syrichas

Assistant Headteacher